

WAXYAABAHA KEENA BIILAL SARE AAN AHAYN DAADASHO:

MA TAHAY KORODH XILLIYEED?

Khaayimiinta waxa badanaa lagu calaamadeeyaa:

- Waraabinta cawska, beeraha, iyo geedaha cusub
- Dhaqidda baabuurta
- Buuxinta barkadaha
- Isticmaalka qaboojiyayaasha ku shaqeeya biyo
- Isticmaalka mishiinada dhaqidda ee cadaadiska sare

Ma jireen dad dheeraad ah oo guriga joogay sababo shaqo, waxbarasho, fasaxa gu'ga, ciidaha ama sabab kale?

MA YAHAY BIILKA UGU HORREEYA EE SANNADKA CUSUB?

Qarashyada biyaha iyo bulaacadaha badanaa way kordhaan sannad kasta. Haddii aad isticmaalayso isla qaddarka biyaha balse aad bixinayso lacag ka badan, hubi in qiimaha la kordhiyay inta u dhaxaysa biilasha.

QARASH BADAN MA KU BIXINAYSAA BULAACADAH?

Guryaha halka ama labada qoys ka kooban, qiimayaasha isticmaalka bulaacadaha waxaa la dejiyaa jiilaalka marka isticmaalku yar yahay. Qiimaha kaddib waa la xaddidaa inta sannadka ka hadhay oo dhan. Haddii aad heshay isticmaal aad u badan jiilaalka ama daadasho inta lagu jiray billaha jiilaalka ee la xaddiday, qiimahaaga la dejiyay waa uu ka badnaan doonaa intii caadiga ahayd.

MA KUGU SOO KORDHEEN QARASHAAD KALE? Lacago daahay? Biilkan ma ku jireen hadhaayo hore? Qarashyadan ma la xiriiraan adeegyadaada magaalada? (Nalalka jidadka, dibu-warshadaynta, iwm.)

Haddii midkoodna usan sharrixi karin korodhka biilka, waxaa suurto gal ah inay jirto daadasho! AKHRI WAX DHEERAAD AH si aad u ogaatid sida loo hubiyo musqushaada ama mitirka biyaha si aad u ogaatid daadasho.

HELIDDA & AKHRINTA MITIRKA BIYAHA

Mitirka biyaha wuxuu inta badan ku yaal gudaha gurigaaga, qiyaastii hal cag ayuu dhulka ka sarreeyaa, gaar ahaan qaybta hoose. Waxaa kale oo laga heli karaa meelaha hoose ee guriga, god guriga ku yaal, ama qolka adeegyada.

AKHRINTA MITIRKAAGA

Shaashadda mitirka waxay isku beddeshaa wadarta biyaha la isticmaalay marna heerka socodka biyaha

Waxaad u baahan doontaa toosh!



Akhri tirooyinka bidix ilaa midig si aad u hesho akhriska saxda ah ee mitirka



Isticmaal toosh si aad u iftiimiso shaashadda mitirka. Ku iftiimi iftiinka tooshka astaanta, ama moodheelada qaar unugga tamarta.

➔ Raac Muujiyaha:

Muuqda oo keliya markay biyuhu socdaan

➔ Sheegaha Daadashada:


Kani wuxuu sheega inay jirto daadasho. Wuxuu xusaa in biyaha la isticmaalayay inta badan maalintii. Haddii aanay jirin wax daadasho ah, calaamadda qasabadu ma muuqan doonto.

RATE Muujiyaha Qiimaha: "RATE" macnaheedu waa qiimaha biyaha dhex maraya mitirkaaga biyaha. Qiimaha waxaa lagu cabbiraa kuyuubik fiit halkii daqiiqo.

DBaro sida loo isticmaalo mitirkaaga biyaha si aad u ogaatid daadashada musqusha: tinyurl.com/waterMeterTest



Daadashada Biyuhu Ma Kugu Dallacayaan Lacag?



HELIDDA & HAGA AJINTA DAADASHADA

Gurigaaga iyo ogaanshaha sababaha kale ee keena biilasha sare

KA BARO!

WWW.STPAUL.GOV/WATER

1900 Rice Street
Saint Paul, MN 55113
(651) 266-6350
waterinquiries@stpaul.gov



HELIDDA DAADASHADA

Rhubinta Musqulaha Daadinaya



1. Ka qaad dabooka haanta musqusha.
2. Ku dar dhowr dhibcood oo ah kiniinka midabka cuntada ama khad haanta suuliga.
3. Walaaq biyaha ku jira taangiga adiga oo isticmaalaya mulqaacad dheer ama ul.
4. Ha falaashin ama ha isticmaalin musqusha.
5. Sug ugu yaraan 25-30 daqiiqo khadka (sug ilaa saacad haddii aad isticmaalayso midabeeyaha cuntada)
6. Eeg taangigga. Haddii midabku ka soo baxo taangiga oo u gudbo saxanka, waxaa jirta daadasho musqusha ah.

SABABAHA KALE EE DAADASHADA


In kasta oo musquluhu ay yihiin sababaha ugu badan ee keena daadinta biyaha guriga, haddana iyagu maaha kuwa kaliya. Haddii aad hore uga tijaabisay musqulahaaga daadasho, hubi meelaha kale ee caadiga ah:

- Qasabadaha/madaxyada qubayska
- Tuubooyinka musqusha/ tuubooyinka dhardhaqa
- Nidaamyada waraabka ee bannaanka
- Tuubooyinka bannaanka (oo dilaaca qabow/kulayl dartiisa)
- Qalabka kulayliyaha guriga ee ku dhow qasabada
- Mishiinada jilciya biyaha
- Kuleyliyaasha biyaha

Ogeysiis: Talooyinkani waa kuwo guud. SPRWS waxay ku talinaysaa inaad la xiriirto tuubiste (plumber) haysta ruqsad sharci ah si aad u hesho talo xirfadeed haddii aad u baahan tahay caawimo dheeraad ah.

HAGAAJINA MUSQULAHA DAADINAYA

Daadashada musqushu waxay khasaarin karaan boqolaal, xitaa kumanaan gallaan oo biyo ah maalintii, taasoo noqon karta qaali!



Qiimee Flapper-ka

Qaybaha flapper-ka ee musqusha oo duugoobay ama xumaaday waa sabab caadi ah oo keenta daadashada biyaha. Flapper-yadu waa qaybo ka samaysan caag oo qiimo jaban leh, kuwaas oo ururin kara macdan ama si tartiib ah u burburi kara muddo ka dib.

Beddelka flapper-ka wuxuu noqon karaa xal fudud oo degdeg ah!

Adigoo xidhan galoof la tuuri karo, geli gacantaada si aad u taabato flapper-ka ku yaalla hoosta ee haanta musqusha. Haddii uu qalloocan yahay ama ay ka soo baxdo wasakh madow marka la taabto, waa in aad beddeshaa flapper-ka.

Do you have to jigMa u baahan tahay inaad ruxdo gacanta si aad u joojiso socodka biyaha ee musqusha?

Waxaa laga yaaba inaad u baahan tahay inaad hagaajiso silsiladda si flapperku si sax ah ugu fadhiisto kursiga waalka.

TALLOOYINKA KALE:

- Haddii waalka/afka aan si sax ah loo hagaajin ama uu cilad yeesho, waxa laga yaabaa inuu keeno dhawaq foori ah ama qaylo yar marka haanta la buuxinayo. Isku day inaad hagaajiso waalka buuxinta; haddii ay taasi xal noqon weydo, waxaa laga yaabaa inuu u baahdo in la bedde replaced.
- Haddii biyuhu si joogto ah ugu qulqulayaan haanta kadibna uga daadayaan tuubada xad-dhaafka (overflow tube), waxaa laga yaabaa in "float"-ka u baahan yahay in la hagaajiydo. Haddii hagaajinta float-ku aysan xallin dhibaataada, waxaa laga yaabaa in loo baahdo in la beddelo waalka buuxinta.

XAQIIQADA DAADINTA



guryaha waxay leeyihiin duleelo **KHASAARIYA 90 GALAAN** ama ka badan maalintii

Daadashada yar ee biyaha ayaa noqota qiyaastii



Gallaanada biyaha ee khasaara sannad walba



Biyaha qoyska ee sannadkii la isticmaalo



Qasabad Daadinaysa

daadinta qiime ah hal dhibic hal dhibic ilbiriqsigii waxay khasaarin karta in ka badan

3,000 GALAAN sannadkiiba

Shaawar daadinaya **10 DHIBIC** daqiiqadiiba

waxaa khasaaraya **500 GALAAN** sannadkiiba

Ku beddel musqulaha hore moodheelada Dareema Biyaha oo keydi

13,000 Gallaan

oo biyo ah qoyska dhexe



KEYDI 10%

biilashaada biyaha

Data Source: EPA